



XAFIISKA QARAMADA MIDOOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

WAR SAXAAFADEED 21/2014

Ergeyga Qaramada Midoobey u Qaabilsan Soomaaliya ayaa soo dhoweeyey horumarka ilaa iyo hadda laga gaarey xalka siyaasadeed ee koonfur galbeed Soomaaliya

Muqdisho, 20 Maajo 2014 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey u Qaabilsan Soomaaliya (SRSG), Nicholas Kay, ayaa la kulmey wafdi ka socda koofur galbeed Soomaaliya oo uu hogaaminayo Madoobe Nuunow, wuxuuna ugu baaqey dhammaan dhinacyada (ay arintu khuseyso) in ay arimaha Baydhaba ka gaaraan heshiis loo wada dhan yahay kaas oo ay garwadeen ka tahay Dowladda Federaalka Soomaaliyeed.

Weli muran ayaa Baydhaba ka taagan maadaama madaxda siyaasadda isaga soo horjeeda, Madoobe Nuunow iyo Maxamed Cabdi Nuur Madeer, uu mid walba wato hindisayaal siyaasadeed ee is-diidian kuna qotoma maamul u sameyn taas oo gobollo ka kooban lix ama saddex gobol ee koonfur galbeed Soomaaliya.

“Kulankeyga maanta wuxuu ahaa mid aan ku taageerayey wadahadaladda uu garwadeenka ka ahaa Raysulwasaaraha Soomaaliya, Cabdi Weli Sheekh Axmed. Wuxaan soo dhoweynayaa diyaar ahaanshaha dhammaan dhinacyada (ay arintu khuseyso) si ay u yeeshan wadahadallo aan shuruudi ku xirneyn ayna ku baadi goobayaan xal nabadi ku dhisan tahay. Wuxaan ku faraxsanahay ilaa iyo hadda horumarka la gaarey. Wuxaan ku guubaabinayaa dhammaan dhinacyada (ay arintu khuseyso) in ay gaaraan xal siyaasadeed oo loo wada dhan yahay kaasoo u horseedaya habkii lagu sameyn lahaa maamul goboleed kumeelgaar ah oo uu yeesho koonfur galbeed Soomaaliya, maamulkaas oo aqoonsi ka helaya Dowladda Federaalka Soomaaliya sidoo kalena taageero ka helaya bulshada caalmaka. Ayadoo ay garwadeen ka tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya, ayaa looga baahan yahay dhammaan dhinacyada (ay arintu kuseyso) in ay gaaraan heshiis ixtilaamaya Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ah iyo heshiisyada hadda jira. Wuxaa kale oo iyadana aad muhiim u ah in la xaqijiyo in dhammaan maamul goboloeedyada kumeelgaarka ah ay ahaadaan kuwo loo wada dhan yahay. Arintani waxaa ay khuseysaa maamulka Kumeelgaarka ah ee Jubba (IJA) iyo Maamulka kumeelgaarka ah ee mustaqbalka ka dhallan doona koonfur galbeed kaas oo aan rajeynayo in uu si dhakhso leh u taabogalo.

“Xal si dhakhso leh loo helo sidoo kaleetana loo sameeyo maamul kumeelgaar ah, ayaa u suurtagelinaaya bulshada caalamka iney si buuxda ula shasqeyso maamulka (koonfur galbeed) ayadoo u mareysa Qorshaha Hiigsiga Cusub ee Soomaaliya (the New Deal Compact for Somalia). Sidoo kale waxay arintu albaabka u fureysaa sidii lagu horumarin lahaa arimaha amniga, si waxtar lehna loola dagaalami lahaa Al Shabaab. Qaramada Midoobey waxaa ka go’an in ay sii waddo taageerada ay siineyso Dowladda Federaalka Soomaaliyeed kuna aadan qorshaheeda nabad sameynya iyo qaran dhisidaba. Wuxaan aniga diyaar u ahay in aan la kulmo dhammaan dhinacyada (ay arintu khuseyso) si loo baadigoobo helitaanka nabad waarta iyo barwaqaqo ka dhalata Soomaaliyaba. Waxaa aad muhiim in waqtiga laga faa’iideysto, waxaanan rajeynayaa in uusan qofna horistaagin wadada lagu gaarayo horumarka” ayuu yiri Mudane Kay.